

TILMAAMAH ADEEGGA BOOSTADA

BARNAAMIJKA U DOODISTA AMARKA ILAALINTA

KING COUNTY COURTHOUSE
516 Third Ave, Room C213
Seattle, WA 98104
206-477-1103

REGIONAL JUSTICE CENTER
401 North Ave, Room 2B
Kent, WA 98032
206-477-3758

Waxbarashada Adeegga ee Boostada Lagu bixiyo

1. **Diyaari boosto.** Raadi qof wayn (18+ jir ah), oo aan ahayn dacwoodaha, kaas oo diyaar u ah inuu kuu soo diro dukumiintiyada. Diyaari laba bashqad oo leh ciwaanka soo celinta, iyo ciwaanka jawaab bixiyaha (oo ku qoran Adeegga Amarka Boostada). Ku soo lifaaq hal nuql oo dukumiinti ah oo u baahan in lagu keeno baqshad kasta.
2. **Boosto ku dir Dukumiintiga/** Dukumiintiyada waa in lagu soo diraa boostada ugu yaraan 8 maalmood oo ah maalmaha shaqada (10 maalmood oo taariikh) kahor taariikhda maxkamada xigta. Dirihi waa inuu boosto kusoo diraa:
 - a. **hal boqshad oo uu kusoo diraayo boosto heerka koowaad; iyo**
 - b. **hal boqshad oo lagu soo diro boosto shahaadaysan, rasiidh soo celin ah oo la cadsaday (oo muujinaya goorta iyo cidda warqadda loo diray)**
3. **Hay risiityada.** Uruuri warqadda risiitka ee la xaqiijiyay (sawirka hoose) iyo rasiidka boostada heerka koowaad.
4. **Buuxi Adeegga Caddeyntha.** Kadib marka uu labada boqshadba boosto ku diro, dirihu waa inuu buuxiyo foomka Adeegga Caddeyntha uuna dib ugu soo diraa cadsadaha. Ku lifaaq rasiidhka diiwaanka iyo warqadda boostada ee cagaaran ee foomka Caddaynta ee dhammaystiran.
5. **U sheeg Laanta Fulinta Sharciga.** Ka bixi nuql foomamkaan soo socda: Caddayntaada dhammaystiran ee Adeegga, iyo Foomka Maclumaadkaga Qarsoon ee Dhaqangelinta Sharciga (Law Enforcement Confidential Information Form, LECIF). Sii labada dukumiinti hay'ada fulinta sharciga halka qofka la dhowraayo ku nool yahay (Booliska magaalada ama laanta sharciga ee degmada). Dukumiintigaan waxaad ku diri kartaa boosto, iimayl ama waxaad si ofleyn ah ugu geyn kartaa qofka.
6. **Soo gudbi caddaynta Adeegga oo dhammaystiran kahor dhegeysiga soo socda.** Soo gudbi caddaynta Adeegga oo dhammaystiran iyo risiityada xafiiska boostada oo la wadaag karaaniga maxkamada. Wuxaad tan u xarayn kartaa si elektaroonig ah ama waxaad si shaqsi ah uga xaraysan kartaa maxkamadda.

Tilmaamaha Boostada La Xaqiijiyay

- Hubi in baqshadu ay leedahay ciwaanka lagu soo celinaayo ee soo diraha. Xaqiji in qofka helaaya magaciisa si cad loogu qoray boqshada.
- Iisticmaal risiitka boostada la xaqiijiyay (eeg hoos). Hayso nuqluka asalka ah oo ka bixi nuqulo
- Marka boqshadda la diro, qofka wayn ee soo diray (ee aan ahayn cadsadaha) waa inuu buuxiyaa foomka Caddaynta adeegga
- Ku lifaaq nuql ka mid ah heerka koowaad iyo rasiidhada boostada ee la xaqiijiyay foomka Caddaynta adeegga



TILMAAMAH ADEEGGA BOOSTADA

Tilmaamaha Boostada Heerka Koowaad

- Hubi in baqshadu ay leedahay ciwaanka lagu soo celinaayo ee soo diraha. Xaqiiji in qofka helaaya magaciisa si cad loogu qoray boqshada.
- Bixi lacagta boostada heerka koowaad oo codso risiit. Hayso nuqulka asalka ah oo ka bixi nuqulo
- Marka boqshadda la diro, qofka wayn ee soo diray (ee aan ahayn codsadaha) waa inuu buuxiyaa foomka Caddaynta adeegga
- Ku lifaaq nuqul ka mid ah heerka koowaad iyo rasiidhada boostada ee la xaqiijiyay foomka Caddaynta adeegga

